



Washington Apple Health

Caruurta kujira daryeelka korinta
ama taakulaynta korsashada, iyo dhalin
kujirey daryeelka korinta hore



[English] Language assistance services, including interpreters and translation of printed materials, are available free of charge. Call 1-800-562-3022 (TRS: 711).

[Amharic] የቋንቋ እገዛ አገልግሎት፣ አስተርጓሚ እና የሰነዶችን ትርጉም ጨምሮ በነጻ ይገኛል። 1-800-562-3022 (TRS: 711) ይደውሉ።

[Arabic] خدمات المساعدة في اللغات، بما في ذلك المترجمين الفوريين وترجمة المواد المطبوعة، متوفرة مجاناً، اتصل على رقم 1-800-562-3022 (TRS: 711).

[Burmese] ဘာသာပြန်ဆိုသူများနှင့် ထုတ်ပြန်ထားသည့် စာရွက်စာတမ်းများဘာသာပြန်ခြင်းအပါအဝင် ဘာသာစကားအထောက်အကူဝန်ဆောင်မှုများကို အခမဲ့ရရှိနိုင်ပါသည်။ 1-800-562-3022 (TRS: 711) ကိုဖုန်းခေါ်ဆိုပါ။

[Cambodian] សេវាជំនួយភាសា រួមមានទាំងអ្នកបកប្រែផ្ទាល់មាត់ និង ការបកប្រែឯកសារបោះពុម្ព គឺអាចរកបានដោយឥតគិតថ្លៃ។ ហៅទូរស័ព្ទទេវៈលេខ 1-800-562-3022 (TRS: 711)។

[Chinese] 免费提供语言协助服务，包括口译员和印制资料翻译。请致电 1-800-562-3022 (TRS: 711)。

[Korean] 통역 서비스와 인쇄 자료 번역을 포함한 언어 지원 서비스를 무료로 이용하실 수 있습니다. 1-800-562-3022 (TRS: 711)번으로 전화하십시오.

[Laotian] ການບໍລິການດ້ານພາສາ, ລວມທັງມາຍແປພາສາ ແລະ ການແປເອກສານຕີພິມ, ມີໄວ້ໃຫ້ຟຣີໂດຍບໍລິເວນ. ໂທຫາເລກ 1-800-562-3022 (TRS: 711).

[Oromo] Tajajilli gargaarsa afaanii, nama afaan hiikuu fi ragaalee maxxanfaman hiikuun, kaffaltii malee ni argattu. 1-800-562-3022 (TRS: 711) irratti bilbilaa.

[Persian] خدمات کمک زبانی، از جمله مترجم شفاهی و ترجمه اسناد و مدارک (مطالب) چاپی، بصورت رایگان ارائه خواهد شد. با شماره 1-800-562-3022 (TRS: 711) تماس بگیرید.

[Punjabi] ਭਾਸ਼ਾ ਸਹਾਇਤਾ ਸੇਵਾਵਾਂ—ਦੁਭਾਸ਼ੀਏ ਅਤੇ ਪ੍ਰਿੰਟ ਕੀਤੀ ਹੋਈ ਸਮੱਗਰੀ ਦੇ ਅੰਨ੍ਹਵਾਦ ਸਮੇਤ—ਮੁਫਤ ਉਪਲੱਬਧ ਹਨ। 1-800-562-3022 (TRS: 711) 'ਤੇ ਕਾਲ ਕਰੋ।

[Romanian] Serviciile de asistență lingvistică, inclusiv cele de interpretariat și de traducere a materialelor imprimate, sunt disponibile gratuit. Apelați 1-800-562-3022 (TRS: 711).

[Russian] Языковая поддержка, в том числе услуги переводчиков и перевод печатных материалов, доступна бесплатно. Позвоните по номеру 1-800-562-3022 (TRS: 711).

[Somali] Adeego caawimaad luuqada ah, ay ku jirto turjubaano afka ah iyo turjumid lagu sameeyo waraaqaha la daabaco, ayaa lagu helayaa lacag la'aan. Wac 1-800-562-3022 (TRS: 711).

[Spanish] Hay servicios de asistencia con idiomas, incluyendo intérpretes y traducción de materiales impresos, disponibles sin costo. Llame al 1-800-562-3022 (TRS: 711).

[Swahili] Huduma za msaada wa lugha, ikiwa ni pamoja na wakalimani na tafsiri ya nyaraka zilizochapishwa, zinapatikana bure bila ya malipo. Piga 1-800-562-3022 (TRS: 711).

[Tagalog] Mga serbisyong tulong sa wika, kabilang ang mga tagapagsalin at pagsasalin ng nakalimbag na mga kagamitan, ay magagamit ng walang bayad. Tumawag sa 1-800-562-3022 (TRS: 711).

[Tigrigna] ተርጓሚትን ናይ ዝተፅሓፉ ማተርያላት ትርጉምን ሓዊሱ ናይ ቋንቋ ሓዝ ግልጋሎት፣ ብዘይ ምንም ክፍሊት ይርከቡ። ብ 1-800-562-3022 (TRS: 711) ደውሉ።

[Ukrainian] Мовна підтримка, у тому числі послуги перекладачів та переклад друкованих матеріалів, доступна безкоштовно. Зателефонуйте за номером 1-800-562-3022 (TRS: 711).

[Vietnamese] Các dịch vụ trợ giúp ngôn ngữ, bao gồm thông dịch viên và bản dịch tài liệu in, hiện có miễn phí. Gọi 1-800-562-3022 (TRS: 711).



Waxa aad ka heli doontid buuggarahaan

Kusoo dhowoow Washington Apple Health	5
Adeegaha Apple Health	5
Kaarkaaga adeegaha	6
Adeegaha caafimaadka (Daryeelka aasaasiga ah)	7
Adeegyada Caafimaadka Hab dhaqanka	8
Hindida Mareykanka iyo Alaskan Dhalad ah	11
Xiriirada adeegaha Caafimaadka Hab dhaqanka	13
Adeegaha ay dhici karto in aad u baahatid si aad u heshid daryeel caafimaad	14
Xuquuqahaaga iyo mas'uuliyadahaaga	15
Nagala soo xiriir/xogaga	16

Sidee lagula xiriiri karaa Kooxda Caafimaadka Daryeelka Koriinta (FCMT)

Haddii aad qabtid su'aalooyin buuggarahaan aan kaaga jawaabin, fadlan ka wac Kooxda Caafimaadka Koriinta:

Bilow in aad garaacdid 1-800-562-3022

Fariinta duuban waxay ku dhihi doontaa, "This call will be monitored or recorded for documentation purposesThank you for calling the Health Care Authority Washington's Apple Health Medicaid...."

Riix 1

Fariinta labbaad ee duuban waxay ku dhihi doontaa, "If you have an extension number, press 1 now..."

Riix 1

Gali nambarka kordhinta 15480. Waxaad maqli doontaa, "Your call is being transferred to an agent please hold..."

Afeef kusaabsan buugg yarahaan:

Buugg yarahaan wuxuu kubari doonaa dheefahaaga wuxuuna kuu sharxi doonaa xuquuqahaaga iyo masuuliyadahaaga, iyo sida looga helo adeegaha tooska qorshahaaga caafimamadka. Fadlan lasoco buugg yarahaan masamaynayo wax xuquuqo sharci ah ama xaq u yeelasho ah. Waa in aadan isku halaynin buugg yarahaan sidii in uu yahay keliya xogta macluumaadka kusaabsan Apple Health Foster Care (AHFC). Waxaad ka heli kartaa macluumaad faah-faahsan oo ku saabsan AHFC adiga oo aada bogga *Sharciyada iyo Xeerarka* ku yaala bogga internetka Maamulka Daryeelka Caafimaadka www.hca.wa.gov/about-hca/rulemaking.

Kusoo dhowoow Washington Apple Health

Buugg yarahaan waxaad u qaadanaysaa sababtoo ah waxaad waqti dhow isku qortay gudaha Daryeelka Xanaanada Caafimaadka Apple (Apple Health Foster Care (AHFC), midkaas oo bixinaya ceymis kujirid loogu talagalay carruurta kujira daryeelka xanaanada ama qaadanaya adeegaha taakulaynta koriska, iyo ka qalinjebiyaasha (dhallin yar oo ku jiray daryeelka xanaanada).*

Maamulka Daryeelka Caafimaadka Gobolka Washington (HCA) wuxuu maareeyaa Washington Apple Health, ay kujirto AHFC, wuxuuna qandaraas lagalayaa qorshaha caafimaadka si lagu siiyo ceymis kujiridaada. Wakhti dambe waxaad heli doontaa Buugga Dheefooyinkaaga Caafimaadka oo kayimid dhinaca qorshaha caafimaadkaaga. Buuggaas wuxuu bixin doonaa macluumaad faah-faahsan oo kusaabsan dheefahaaga laceymis geliyay.

Sida qayb kamid ah ballanteena aynu ku marnay in aynu ku siino daryeel wanaagsan, barnaamijka Daryeelka Xanaanada Caafimaadka Apple (Apple Health Foster Care) waxaa lagu dhafay caafimaadka hab dhaqanka iyo jirka ee waddanka oo dhan ah, midkaas oo loo yaqaano sida daryeelka maareysan ee isku dhafka ah. Daryeelka maareysan ee isku-dhafka ah, qorshaha daryeelka maareysan ayaa iskuduwaya kadibna bixinaya dhammaan adeegaha caafimaadka hab dhaqanka iyo jirka. Adeegahaan waxaa kamid ah adeegaha daaweynta xanuunka isticmaalka daroogada iyo caafimaadka maskaxda. Adigu kama qaadan doontid adeegaha caafimaadka hab dhaqanka dhinaca Ururka Caafimaadka Hab dhaqanka (BHO) ee gobolka.

Adeegaha Apple Health

Kuwaan waa qaar kamid ah adeegaha la heli karo:

- Ballamada lala yeesho dhakhtarka ama xirfadlaha daryeelka caafimaadka loogu talagalay daryeelka lagama maarmaanka ah waxaa kamid ah adeegaha kahortaga iyo ficnaanshaha iyo maareynta cudurka dabadheeraada
- Daryeelka caafimaadka xaalada degdega ah
- Adeegaha caafimaadka ilmaha, ay kujirto daryeelka afka iyo araga
- Adeegaha shaybaarka
- Daawooyinka wata qoraal dhakhtar
- Isbitaal dhigid
- Adeegaha bukaanka ambalaaska
- Adeegaha baxnaaniska iyo ficnaanshaha** iyo qalabka
- Adeegaha caafimaadka maskaxda
- Daryeelka ilmaha dhasha iyo dhalmada

Liiskan waxaa loogu talagalay macluumaad guud oo keliya mana dammaan qaadayso in AHFC ay ceymis gelinayso adeega.

Ka fiiri buuggyaraha xubinka qorshahaaga caafimaadka wixii ku saabsan adeego iyo dheefo ceymis kujirid dheeri ah. Haddii adeeg aad u baahantahay aan laqorin, kafiiri dhinaca bixiyaha daryeelka caafimaadkaaga ama qorshahaaga caafimaadka.

Qorshahaaga caafimaadka

Maamulka Daryeelka Caafimaadka (HCA) wuxuu qandaraas lagalay qorshaha caafimaadka soo socda si loo bixiyo ceymiskaaga:

Xiriirada Aasaaska Apple Health [ee laga maamulo dhinaca Iskuduwida Daryeelka Washington (CCW)]
1-844-354-9876 ama online-ka:
<https://www.coordinatedcarehealth.com/members/foster-care.html>

Xaaladaha qaar waxaad heli kartaa daryeel caafimaad aan lasoon isqorid la isku qoro qorshe caafimaad. Isla markiiba soo wac Kooxdeena Caafimaadka Daryeelka Korinta haddii mid ama wax kabadan oo xaaladaha soo socda kamid ahi ay adiga kugu

dhacaan. Si aad noosoo wacdid, wac 1-800-562-3022, ext. 15480.

- **Adiga waxaad haysataa ceymis caafimaad** aanan ahayn Apple Health ama waxaad noqotey qof u qalma caawimaad Caafimaad.
- **Adigu waxaad tahay qof aan haysan guri**, waxaad kunooshahay hoy, ama waxaad haysataa cinwaan kumeel gaar ah.
- **Adiga waxaad tahay Hindiga Mareykanka ama Qof u dhashay Alaska.** Waxaad tixgelin kartaa doorashada aan ahayn ceymiska laga qaato tooska qorshaha daryeelka la maamulay.
- **Waxaad qabtaa xaalad caafimaad la xaqiijin karo**, bedelida dhakhtarada iyo qorshooyinka caafimaadkana waxay carqaladayn doontaa daaweyntaada waxayna halis gelin doontaa caafimaadkaaga.

Kala xiriir xubinka qorshahaaga caafimaadka lambarka adeegaha marka aad:

- Qabtid mushkilad laxiriirta qorshahaaga caafimaadka.
- U baahantahay in aad hesho bixiye daryeel aasaasi ah.
- Doonaysid in aad bedeshid daryeel bixiyahaaga aasaasiga ah (PCP).
- Weysid ama dhumisid kaarka Aqoonsiga qorshahaaga caafimaadka oona doonaysid midkale.
- Qabtid baahi daryeel caafimaad khaas ah (ama ilmahaaga qabbo).
- U baahantahay in aad hesho adeegaha caafimaadka maskaxda.

**Waxaan isticmaalaynaa "adiga" guud ahaan buugg yarahaan si loo aqoonsado qofka qaadanaya dheefahaan. Anagu waan fahmi karnaa in waqtiga intiisa baddan, qofka weyn ee masuulka ka ah ilmaha qaadanaya dheefaha uu dhab ahaantii akhriyayo buugg yarahaan.*

***Laxiriir qorshahaaga caafimaadka si aad u oggaatid haddii aad u qalantid.*



Kaarka adeegahaaga




Inta baddan dadka waxay kuqaadan doonaan labbo kaar gudaha iimayl. Midka koowaad waa Kaarka Adeegahaaga, midkaas oo aad qaadanaysid sababtoo ah adiga waxaad haysataa ceymis kujirid Washington

Apple Health. Khasab kuguma ahan in aad kashaqaysiiso Kaarka Adeegahaaga cusub. Maamulka Daryeelka Caafimaadka ayaa kashaqaysiin doona kaarkaaga kahor inta aan lagu soo dirin.

Haddii aadan kuqaadan Kaarka Adeegahaaga gudaha labbo todobaad ama aad wayso kaarkaaga, fadlan wac Kooxda Caafimaadka Daryeelka Korinta. Si aad noosoo wacdid, wac 1-800-562-3022, ext. 15480.

Kaarka labbaad wuxuu ka ahaanayaa dhinaca qorshaha caafimaadka midkaas oo maamuli doona daryeelkaaga.

Kaarkaaga qorshaha caafimaadka ee AHFC (Apple Health Foster Care)



Dhowr todobaad kadib marka aad isku qortid Apple Health, waxaad heli doontaa kaar Aqoonsi qorshe caafimaad sidoo kale macluumaad baddan oo kusaabsan sida loo doorto dhakhtar ama bixiye daryeel aasaasi ah

(PCP). Kaarkaaga Aqoonsiga qorshaha caafimaadka wuxuu u ekaan doonaa sida midka kor laguugu tusey. Hayso kaarkaan, sidoo kale! Hore usoo qaado dhammaan Kaarka Adeegahaaga iyo kaarka qorshahaaga caafimaadka marka aad aadaysid dhakhtar, farmashiye, ama meel kale oo daryeel caafimaad bixiye ah. Sidoo kale waxaad u baahnaan kartaa Aqoonsi sawir.

ProviderOne

Waxaad ku arki doontaa "ProviderOne" oo kuqorantahay Kaarka Adeegahaaga. ProviderOne waa nidaamka macluumaadka isku keen duwa qorshooyinka caafimaadka kuna caawiya Maamulka Caafimaadka Daryeelka in uu kuugu soo diro macluumaadka waqtiyo kaladuwan. Lambarka kuqoran dusha kaarka waa lambarka macmiilka ProviderOne-kaaga.

Xubin kasta oo katirsan qoyskaaga midkaas oo u qalma AHFC wuxuu qaadan doonaa Kaarkeeda ama Kaarkiisa Adeegaha. Qofkasta wuxuu haystaa lambar macmiil ProviderOne gooni ah midkaas oo uu asagu ama ayadu haysanayso intiiba uu noolyahay.

Haddii aad u baahatid dhakhtar ama qoraal daawo kahor inta aan kaararkaaga kuu imaanin ama kusoo gaarin

Waa muhiim in la doorte bixiyaha daryeelka aasaasiga ah (PCP). **Haddii aadan dooran PCP, qorshaha caafimaadkaaga ayaa mid kuu dooraya.** PCP-gaaga waa xirfadlaha caafimaadka ugu muhiimsan ee aad arkaysa. Waxaa ay aqoon u yeelan doonaan taariikhda caafimaadkaaga, arrimaha caafimaadka ee hadda, oo waxaa uu kuu gudbin karaa takhasuslayaal. Marka aad leedahay PCP adiga kuu gaar ah waxaa fududeynaysaa in la daryeelo caafimaadkaaga.

Haddii aad u baahantahay in aad aadid dhakhtar, ama buuxisid qoraal daawo kahor inta aan kaararkaaga imaanin, waxaad aadi kartaa dhakhtar kasta, xarun caafimaad kasta, ama farmashiye kasta qorshahaaga caafimaadka wuxuu qandaraas lagelayaa (shabakadooda). Waxaad caawimaad u wici kartaa qorshahaaga caafimaadka, xitaa haddii aadan qaadan Kaarka Adeegahaaga ama kaarka Aqoonsiga qorshaha caafimaadka. Tusaale ahaan, wac qorshahaaga caafimaad haddii aad u baahantahay caawimaad laguugu xiriiriyo bixiyaha daryeelka caafimaadka aasaasiga ah ee jooga meeshaada.

Doorashada bixiye daryeel aasaasi ah

Si aad u dooratid daryeel bixiye aasaasi ah (PCP), raac tilmaamaha lagaaga soo direy dhinaca qorshahaaga caafimaadka, ama wac lambarka teleefoonka xubinka adeegaha qorshahaaga caafimaadka. Sidoo kale waxaad kadooran kartaa daryeel bixiye aasaasi ah tooska bogga internetka qorshahaaga caafimaadka.

Haddii aad hore u arkaysay daryeel bixiye aasaasi ah oo aad jeceshahay, ama maqashay wax kusaabsan daryeel bixiye aad jeceshahay in aad isku daydid, waad weydiisan kartaa daryeel bixiyahaas. Laakiin daryeel bixiyahaaga aasaasiga ah waa in uu noqdo qayb kamid ah shabakada qorshaha caafimaadkaaga.

Haddii aad u baahantahay daryeel

Daryeelka joogtada ah	Ballan kasamayso daryeel bixiyahaaga aasaasiga ah (PCP). Waxaa khasab kugu ah in aad awoodid in aad samaysid booqasho xafiiska aad kusoo booqatid daryeel bixiyahaaga caafimaadka aasaasiga ah ama daryeel bixiye kale gudaha 10 maalmood.
Daryeelka kahortaga	Ballan kasamayso daryeel bixiyahaaga caafimaadka aasaasiga ah ama daryeel bixiye kale. Waxaa khasab kugu ah in aad awoodid in aad ballan kusamaysatid gudaha 30 maalmood.
Wixii kusaabsan daryeelka saacadaha-kadib	Wac khadka talada kalkaalisada ee qorshahaaga caafimaad 24 saac maalintii, 7 maalmood toddobaadkii.
Wixii kusaabsan daryeelka degdega ah	Aad xarunta daryeelka degdega ah middaas oo heshiiska la leh qorshahaaga caafimaadka, ama wac daryeel bixiyahaaga aasaasiga ah ama khadka latalinta kalkaalisada. Waxaa khasab kugu ah in aad awoodid in aad booqatid daryeel bixiyahaaga caafimaadka aasaasiga ah ama daryeel bixiye kale gudaha 24 saacadood.
Wixii kusaabsan daryeelka degdega ah	Wac 911 ama aad meesha kuugu dhow meeshaas oo ay kugu caawin karaan daryeel bixiyaal xaaladaha degdega ah. Sida ugu dhakhsiyaha baddan ee ugu suurtoogalka ah, ayaa adiga ama qofkale oo aad garanaysid ay khasabtahay in uu u waco daryeel bixiyahaaga caafimaadka aasaasiga ah ama qorshahaaga caafimaadka si loogu sheego xaaladaada degdega ah. Waxaad soo wici kartaa 24 saacadood maalintii, 7 maalin todobaadkii.
Wixii kusaabsan daryeelka kafog guriga	Haddii aysan xaaladu ahayn mid degdega ah, wac daryeel bixiyahaaga caafimaadka aasaasiga ah ama khadka latalinta kalkaalisada.

Waad weydiisan kartaa daryeel bixiye aasaasi oo nin ama naag ah. Sidoo kale waad weydiisan kartaa daryeel bixiye kuhadla luuqadaada, ku takhasusey naafadaada, ama fahma dhaqankaaga.

Daryeel bixiyahaaga aasaasiga ah wuxuu noqon karaan qof aad raaxo kuqabtid. Haddii aadan kufaraxsanayn daryeel bixiyahaaga aasaasiga ah sabab kasta oo ay tahay, wac khadka teleefoonka xubinka adeegaha qorshahaaga wakhti kasta si aad ugu bedeshid daryeel bixiye kale.

Siddee loo sameystaa Ballan

Marka aad dooratid daryeel bixiye aasaasi ah, wac si aad u samaysatid ballan. Waxaa khasab kugu ah in aad qabtid ballan si aad u aragtid daryeel bixiye. Haddii aad qabtid welwelo caafimaad oo degdeg ah ama baahooyin, waxaa khasab kugu ah in aad awoodid in aad ku aragtid daryeel bixiyahaaga aasaasiga ah gudaha dhowr maalmood.

Ilmo kasta/dhalaanka ah meelaynta guriga-dibadiisa-ah waxaa khasab ah in uu kuqaato baaritaanka EPSDT gudaha 30 maalmood ee laga joogo kagelida daryeelka tooska Daryeelka Korinta, Qaraabada, ama Meelayn Habboon. EPSDT waxay u taagantahay Baaritaanka Wakhtiyaysan oona Xilli hore ah, baaritaanka Daaweynta iyo Oggaanshaha cudurka.

Adeegaha Caafimaadka Hab dhaqanka

Haddii aad ku qorantahay Daryeelka Xanaanada Apple Health (Apple Health Foster Care), waxaad geli kartaa ama heli kartaa adeegaha daaweynta xanuunka isticmaalida daroogada (si wadajir ah loogu yaqaano sida adeegaha caafimaadka hab dhaqanka). Adeegaha caafimaadka hab dhaqanka waxaa lagu daray gudaha xirmada dheefaha qorshahaaga daryeelka la maamulay. Dheefaha ma ahan kuwo la bedelay. Isbedelka kaliya ee dhacay waa qorshaha daryeelka la maamulay Xiriirada Aasaaska Caafimaadka Apple Health (Apple Health Core Connections (Coordinated Care of Washington) Iskuduwida Daryeelka Washington ayaa ceymin doona adeegahaan bedelka Ururka Caafimaadka Hab dhaqanka ee gobolka (BHO).

La xiriir qorshahaaga caafimaadka ama bixiyahaaga daryeelka aasaasiga ah haddii aad u baahantahay in laguugu caawiyo iskuduwida daryeelkaaga.

Si aad u heshid adeegaha caafimaadka hab dhaqanka dheeraadka ah:

- Ka wac Khadka Caawimaadda Bogsashada 24-saac, bilaashka iyo qarsoodiga ah ee Washington 1-866-789-1511 (TTY 1-206-461-3219), ama

- Booqo www.waRecoveryHelpLine.org.

Xusuusnoow: Buuggyaraha Dheefta Caafimaadka Hab dhaqanka waxaa laga helayaa www.hca.wa.gov/mental-health-benefits

Wixii ku saabsan macluumaad dheeraad ah oo khuseeya daaweynta caafimaadka iyo adeegaha laga maal geliyay dhinaca HCA, booqo www.hca.wa.gov/mental-health-and-addiction-services



Adeegaha daaweynta xanuunka isticmaalka daroogada waxaa kamid noqon kara:

Qiimeynta— “Wareysi” uu qaado bixiyaha caafimaadka si loo go’aansado adeegaha aad u baahantahay.

Waxqabad daaweyn gaaban— Waqtiga wuu xaddidan yahay, si loo yareeyo dhibaato isticmaal. Adiga **uma** baahnid qiimeyn gudaha bukaan-socodka ah kahor adeegan.

Maamulida Kabixida (Baabi’inta sunta — Caawimaad laguugu caawiyo yareynta isticmaalkaaga aad isticmaashid aalkoolo ama daroogooyin kale in muddo ah, ilaa ay ka noqoto mid ammaan ah in la joojiyo isticmaalka. (Daaweynta ku saleysan isbitaalka waxaa caymiya MCO.) Adiga **uma** baahnid qiimeyn gudaha bukaan-socodka ah kahor adeegan.

Daaweynta Bukaan-socodka — fadhiyo la talin koox ama keli ah oo ka dhaca gudaha bulshadaada.

Daaweyn Bukaan-socod Degdeg ah — Fadhiyo la talin badan oo koox ama kelinimo ah.

Daaweyn Bukaanka-Guriga ah — Barnaamij dhammaystiran oo la talinta qofka kelida ah, lat alin koox, iyo waxbarid, kuwaas oo lagu bixiyo maalintii-24-saacadood xarun la kormeero.

Adeegaha Daaweynta Bedelka U Ah Qaadashada Daroogada Opiate — Waxay bixineysaa qiimeyn bukaan-socodka ah iyo daaweyn loogu talagalay qofka ku tiirsan daroogada opiate. Waxaa kamid ah daawo la oggolaaday iyo latalin.

Maamulid Xaalad — Caawimaad laguugu caawiyo helida adeego caafimaad, bulsho, waxbarasho, iyo adeego kale.





Adeegaha Caafimaadka Hab dhaqanka waxaa kamid noqon kara:

Qiimeynta Qaadashada — Waxay aqoonsanayaa baahiyadaada iyo yoolalka, waxayna caawinaysaa bixiyahaaga caafimaadka dhimirka si uu ugu taliyo adeegyada kale iyo in uu qorsheeyo daaweynta.

Adeegaha Daaweynta Qofka — La talin iyo/ama hawlo kale oo loogu talagalay in lagu gaaro ahdaafta ku qoran qorshahaaga adeega.

Maamulida Daawada — Shaqaale rukhsadaysan ayaa sharxaya daawada oona kaala hadlaya waxyaabaha ku saabsan waxyeelooyinka daawada.

Ilaalinta Daawada — Adeegaha lagu baarayo sida ay u shaqeynayso daawadaada oona laguugu caawinayo in aad u qaadatid si sax ah.

Adeegaha Daaweynta Kooxda ah — La talin lala sameeyo dad kale oo qabba caqabado kuwaaga lamid ah.

Taageero Saaxiibo — Caawimaad laguugu caawiyo raadinta nidaamka caafimaadka maskaxda iyo gaarida ahdaaftaada dib u caafimaadida, midaas oo uu bixiyo qof tababaran.

Daaweyn iyo Soo dhexgal Gaaban — Latalin muddo gaaban oo diirada lagu saaro mushkilad gaar ah.

Daaweyn Qoys — Latalin ku kooban qoyska si loogu caawiyo dhisida xiriir xoogan iyo xalinta mushkilada.

Daaweyn Aad u Xoogan — Adeego ay bixiyaan koox ka kooban bixiyayaal caafimaadka maskaxda ah si ay kuugu caawiyaan in aad gaartid ahdaaftaada ku qoran qorshahaaga adeega.

Daaweynta Waxbarashada Nafsaaniga ah — Waxbarasho kusaabsan jirooyinka maskaxda, doorashooyinka daaweynta caafimaadka, daawooyinka iyo ficnaanshaha, ay kujirto taageerooyinka iyo/ama adeegaha taageerada ah.

Taageerada Maalinta ah — Barnaamij degdeg ah ama xoogan oo lagu baranayo ama lagu caawiyo xirfadaha noolaanshaha madax banaana.

Qiimeyn iyo Daaweyn/Isbitaal dhigid Bulshada ah — Daryeelka dhibaataada bukaan-jiiifka lagama maarmaan u ah caafimaad ahaan. Adiga uma baahnid qiimeyn gudaha bukaan-socodka ah kahor adeegan.

Adeegaha Dejinta — Lagu bixiyo gudaha gurigaaga ama meel guriga-oo kale ah si laguugu caawiyo in aadan joogin isbitaalka. Adiga uma baahnid qiimeyn gudaha ah kahor adeegan.

Maamulida Xaalada Baxnaaniska — Iskuduwid u dhaxeeya adeegahaaga caafimaadka maskaxda bukaan-socodka iyo bukaan-jiiifka. Adiga uma baahnid qiimeyn gudaha bukaan-socodka ah kahor adeegan.

Adeegaha Caafimaadka Maskaxda Lagu Bixiyo gudaha Meelaha Deegaanka — Adeegaha laguugu siiyo meesha aad kunooshahay haddii aad kunooshahay meel koox ah.

Qiimeyn Dad Gaar ah — Caawimaad qorshe daaweyn uu bixiyo takhasusle la shaqeeya dad gaar ah, sida carruurta, dadka waaweyn, ama dad ka yimid asal dhaqan kale.

Qiimeynta Nafsaaniga ah — Baaritaan dad kucaawinaya garashada cudurka, qiimeynta, iyo qorshaha daaweynta.



Adeegaha dhibaatooyinka

Adeegaha arimaha halista ah waa kuwo 24-saac ah oona loogu talagalay in adiga laguugu dejiyo haddii aad ku sugantahay arin halis ah, waxaana lagu bixiyaa meel aad ugu habboon baahoyinkaaga. Adigu uma **baahnid** in aad samaysid qiimeyn qaadasho oo adeegahan loogu talagalay.

- Wixii kusaabsan caawimaad degdeg ah, wac 911 ama aad qolka xaaladaha degdega ah ee kuyaala isbitaalka kuugu dhow. Adigu uma **baahnid** in laguugu oggolaado adeegaha dhibaataada.
- Wixii ku saabsan Buugga Khadadka Gobolka, booqo: www.hca.wa.gov/mental-health-crisis-lines.
- Khadka Washington ee Caawimaada Bogsashada waa mid shaqeeya 24-saacadood oo soo dhexgalka dhibaatooyinka iyo khadka wareejinta ah midkaas oo loogu talagalay dadka la dhibaataaysan arimo xiriir la leh caafimaadka maskaxda, ku xad gudubka daroogada, iyo mushkilad qamaar. Wac 1-866-789-1511 (TTY 206-461-3219); ii-mayl recovery@crisisclinic.org, ama booqo www.warecoveryhelpline.org. Dhallinyarada waxaa lagu xiri karaa dhallinyaro kale inta lagu guda jiro saacado gaar ah: wac 1-866-833-6546, ii-mayl teenlink@crisisclinic.org, ama booqo <https://866teenlink.org>.
- Wixii kusaabsan Khadka Qaranka ee Kahortaga Isdilida: wac 1-800-273-8255 isticmaalayaasha TTY 1-800-799-4889.

Doorasho loogu talagalay caruurta qaadanaya adeegaha taakulaynta korsashada iyo dhalinka kujira daryeelka korinta hore

Ma qaadanaysaa adeegaha taakulaynta korsiga ama ma tahay ka qalinjebiye (dhallin yar oo ku jiray daryeelka xanaanada)? Waxaa laguugu qori doonaa gudaha Daryeelka Xanaanada Apple Health (Apple Health Foster Care) ee qorshaha daryeelka la maamuley. Daryeelka maareysan ee isku-dhafka ah, qorshaha daryeelka maareysan ayaa iskuduwaya kadibna bixinaya dhammaan adeegaha caafimaadka hab dhaqanka iyo jirka. Adeegahaan waxaa kamid ah adeegaha daaweynta xanuunka isticmaalka daroogada iyo caafimaadka maskaxda.

Daryeelka Xanaanada Apple Health (Apple Health Foster Care) ee qorshaha daryeelka isku dhafan ee maareysan ayaa bixinaya iskuduwida daryeelka caafimaadka iyo adeego kale kuwaas oo diirada saaraya baahooyinka carruurta iyo dhallaanka kujira daryeelka xanaanada iyo taakulaynta korsashada, iyo ka qalinjebiye (dhallin yar oo ku jiray daryeelka xanaanada).

Si kastaba, adigu waxaad haysataa doorasho ah in aad bedeshid ceymiska ayada oo aan jirin qorshaha daryeelka la maamulay (sidoo kale loo yaqaano sida lacagta-adeega-lagu bixiyo) ceymiska caafimaadka jirka. Haddii ay sidaasi tahay, waxaad haysan doontaa doorashooyin loogu talagalay adeegahaaga caafimaadka hab dhaqanka . Eeg qorshayaasha Kaliya Adeegyada Caafimaadka Hab-dhaqanka (BHSA) ee laga heli karo degmadaada e bogga 12.

Haddii aad go'aan ku gaartid in aad bedeshid ceymiskaaga Apple Health ayada oo aan la soconin qorshaha daryeelka la maamulay kadib marka aad aragtay oona akhrisay buugga yarahaan, kasoo wac Kooxda Caafimaadka Daryeelka Xanaanada, 1-800-562-3022, fog. 15480.



Macluumaad loogu talagalay Hindida Maraykanka ah iyo Dadka u dhashay Alaska

Haddii aad tahay Hindi Mareykanka ah ama qof u Dhashay Alaska, waxaad awoodi kartaa in aad ka hesho adeegyada daryeelka caafimaadka ee loo marayo xarunta **Adeegga Caafimaadka, barnaamijka daryeelka caafimaadka qabiilka ama Barnaamijka Caafimaadka Hindida lee Magaalooyinka (UIHP)** sida Guddiga Caafimaadka Hindida Seattle iyo Mashruuca ASALKA (NATIVE) ee Spokane. Daryeel bixiyayaasha jooga xarumahaan caafimaadka waxay garanayaan dhaqankaaga, jaaliyadaada, iyo baahoyinka daryeelka caafimaadka.

Ayagu waxay ku siin doonaan daryeelka aad u baahantahay ama waxay kuu wareejin doonaan dhakhtar takhasus ah. Sidoo kale ayaga ayaa waxaa ay kugu caawin karaan go'aannada aad u baahan tahay in aad samaysid ee ku saabsan haddii la dooranayo qorshaha daryeelka la maamulay, (midkaan oo noqon kara Kaliya qorshaha Adeegaha Caafimaadka Hab dhaqanka [BHSO]), ama caynsanaanta Apple Health ee aanan la soconin daryeelka la maamulay (midkaan sidoo kale waxaa lagu magacaabaa ujuurada-adeegga ee Apple Health). Haddii aad qabtid su'aalo ku saabsan daryeelka caafimaadkaaga ama ceymiska daryeelka caafimaadkaaga, qabiilkaaga ama shaqaalaha UIHP ayaa awoodi kara in ay kugu caawiyaan.

Qaababka lagu qaato daryeelka caafimaadka

HCA wuxuu siinayaa Hindida Maraykanka ah iyo Dadka u dhashay Alaska ee ku nool gudaha Washington doorasho u dhaxaysa daryeelka la maamulay ee Apple Health iyo caynsanaanta Apple Health ee aanan la soconin daryeelka la maamulay. HCA wuxuu sidaan u sameeyaa si uu ugu hoggaansamo xeerarka federaalka ah, qirida adkaanta nidaamka keenida daryeelka caafimaadka ee Hindida, iyo in lagu caawiyo habsashada in aad heshid daryeelka caafimaadka munaasabka u ah dhaqan ahaan.

- Caynsanaanta Apple Health ee aanan la soconin daryeelka la maamulay, waxaad ku dooran kartaa daryeel bixiye kasta ee kaqayb qaadanaya barnaamijka ujuurrada-adeegga ee Apple Health wuxuunna hadda aqbalayaa bukaanada. Daryeel bixiyayaashaan waa kuwo weli u baahan in ay kasoo baxaan dhammaan shuruudaha shatiyada ee uu gobalkooda-soo-saaray. Si aad u hesho bixiyaha caafimaadka ujuurrada-adeegga ee Apple Health, booqo <https://fortress.wa.gov/hca/P1findaprovider>.

Doorashadaan waxay macno yeelanaysaa haddii uu daryeelkaagu yahay mid hore loo maamulay, sida barnaamijka caafimaadka qabiileed ama UIHP.

- Marka aad haysato daryeelka maareysan ee Apple Health, daryeelkaaga caafimaadka waxaa maamula ururka daryeel maareysan daryeel maareysan (MCO). Midaan macnaheedu waxay tahay in MCO ay u adeegto sida bartaada kaliya ee xiriirka si aad u hesho adeegyo kugu caawiya isku duwida daryeelkaaga.

Doorashadaan waxay macno yeelanaysaa haddii aadan haysanin qof kuu maamulaya daryeelkaaga.




Waxaad bedeli kartaa doorashadaada (doorashooyinkaaga) waqti kasta, laakiin isbedelku ma noqonayo mid dhaqangal ah illaa laga gaaro bisha kale ee ku xigta. Haddii aad xiriiri la leedahay ama iskaashi la leedahay Caawiye Qabiileed loo marayo xarunta IHS, Barnaamijka caafimaadka qabiileed ama UIHP, waxay kugu caawin karaan in aad gaartid go'aankaaga. Sidoo kale waxaad kala xiriiri kartaa Maamulka Daryeelka Caafimaadka lambarkan 1-800-562-3022 si aad noogu soo sheegtid doorashadaada (doorashooyinkaaga), ay kamid tahay wax kasta oo isbedel ah oo aad doonaysid in aad samaysid, iyo in aad u weydiisid su'aaloyin.

Helida Adeegaha Caafimaadka Hab dhaqanka marka aadan ka haysanin ceymiska caafimaadka jirka tooska Xiriirada Aasaaska Caafimaadka Apple Health (Apple Health Core Connections) (Coordinated Care of Washington) Iskuduwida Daryeelka Washington

Doorashooyinka caafimaadka hab dhaqanka ee laga helo gudaha gobolka daryeelka maareysan ee isku dhafan

County	Amerigroup	Community Health Plan	Coordinated Care	Molina Healthcare	United Healthcare	Integrated managed care
Adams	X	X		X		1/1/19
Asotin	X	X	X	X		1/1/19
Benton	X	X	X	X		1/1/19
Chelan	X		X	X		1/1/18
Clallam	X			X	X	1/1/20
Clark	X	X		X		4/1/16
Columbia	X	X	X	X		1/1/19
Cowlitz	X			X	X	1/1/20
Douglas	X		X	X		1/1/18
Ferry	X	X		X		1/1/19
Franklin	X	X	X	X		1/1/19
Garfield	X	X	X	X		1/1/19
Grant	X		X	X		1/1/18
Grays Harbor	X			X	X	1/1/20
Island	X	X	X	X	X	7/1/19
Jefferson	X			X	X	1/1/20
King	X	X	X	X	X	1/1/19
Kitsap	X			X	X	1/1/20
Kittitas	X	X	X	X		1/1/19
Klickitat	X	X		X		1/1/19
Lewis	X			X	X	1/1/20
Lincoln	X	X		X		1/1/19
Mason	X			X	X	1/1/20
Okanogan	X		X	X		1/1/19
Pacific	X			X	X	1/1/20
Pend Oreille	X			X		1/1/19
Pierce	X		X	X	X	1/1/19
San Juan	X	X	X	X	X	7/1/19
Skagit	X	X	X	X	X	7/1/19
Skamania	X	X		X		4/1/16
Snohomish	X	X	X	X	X	7/1/19
Spokane	X	X		X		1/1/19
Stevens	X	X		X		1/1/19
Thurston	X			X	X	1/1/20
Wahkiakum	X			X	X	1/1/20
Walla Walla	X	X	X	X		1/1/19
Whatcom	X	X	X	X	X	7/1/19
Whitman	X	X	X	X		1/1/19
Yakima	X	X	X	X		1/1/19
Foster Care (statewide)			X			1/1/19



Ogow: Daryeelka Korsashada Apple Health waa barnaamij gobolka oo dhan ah, ee lagu bixiyo isku-xirrada Muhiimka ah ee Apple Health (Daryeelka Isu-duwan ee Washington).

Ururka	Lambarka teleefoonka	Bogga internetka
Amerigroup (AMG)	1-800-600-4441	www.myamerigroup.com/wa
Community Health Plan of Washington (CHPW)	1-800-440-1561	www.chpw.org
Coordinated Care of Washington (CCW)	1-877-644-4613	www.coordinatedcarehealth.com
Molina Healthcare of Washington (MHW)	1-800-869-7165	www.molinahealthcare.com
United Healthcare Community Plan (UHC)	1-877-542-8997	www.uhcommunityplan.com



Xoggag Kale:

- Wixii ku saabsan macluumaad dheeraad ah oo khuseeya adeegaha caafimaadka hab dhaqanka: www.hca.wa.gov/mental-health-andaddiction-services.
- Wixii ku saabsan naseexooyin khuseeya ka hortaga isticmaalka khamrada iyo xashiishka dadka yar-yar: www.StartTalkingNow.org Wixii ku saabsan naseexooyin khuseeya ka hortaga isticmaalka khamrada iyo xashiishka dadka yar-yar: www.StartTalkingNow.org.

Adeegaha laga ceeymiyay dhinaca Apple Health ee aan lahayn qorshaha daryeelka maareysan

Ceymiska Apple Health ee aan lahayn qorshaha daryeelka maareysan wuxuu ceeyminayaa dheefo iyo adeego gaar ah xitaa haddii aad kaga qorantahay qorshaha caafimaadka tooska Daryeelka Xanaanada Caafimaadka Apple (Apple Health Foster Care).

- Taakulaynta iyo adeegaha daryeelka muddada-dheer
- Adeegaha loogu talagalay dadka qaba naafooyinka koriinka
- Adeegaha ilkaha
- Ookiyaalo iyo adeegaha kuhabboon caruurta (kayar da'da 21)
- Adeegaha taageerada dhallida, latashiga hiddaha kahoreeya waalidnimada, iyo joojinada uurka

Haddii aad qabtid su'aal kusaabsan dheefta ama adeega aan halkan lagu qorin, wac 1-800-562-3022, ext. 15480.

Adeegaha ay dhici karto in aad u baahatid si aad u heshid daryeel caafimaad



Waxaa dhici karta in aad u baahatid turjumaan

Haddii aadan si fiican uga hadlin Af Ingiriis ama aad tahay Dhagoole, ama Dhagoole Indhoole, ama uu Maqalka kugu adag yahay, turjumaanlehaal xirfadlayaal ah oo ku hadla luuqado badan ayaa la heli karaa, oo ay ku jiraan luuqadaha dhagooleyaasha, oo aan wax lacag ah kuugu fadhinin. Marka aad sameyso ballan daryeel caafimaad, soo dhoweeyaha ha oggaado haddii aad u baahan tahay turjumaan. Turjumaanada luuqadda hadalka ayaa tagi kara xafiiska bixiyaha ama wuxuu soo geli karaa telefoonka inta lagu guda jirro ballantaada. Turjumaanada luuqadda dhagoolayaasha waxaa ay tagi karaa xafiiska adeeg bixiyaha haddii aad Dhagoole tahay Dhagoole iyo Indhoole tahay, ama uu Maqalka Kugu Adag yahay.

Waxaa wanaagsan in la isticmaalo mid ka kid ah tujumaanadan xirfadlayaasha ah intii lala imaan ahaa xubin ka tirsan qoyska ama saaxiib oo kuu turjuma. Turjumaanada waxaa loo tababarey in ay fahmaan ereyada daryeelka caafimaad. Waxaa ay adinku caawin doonaan adiga iyo adeeg bixiyahaaga in aad isfahamtaan. Wax badan ka baro www.hca.wa.gov/interpreter-services.



Haddii aad qabtid naafo ama curyaanimo

Ihaddii aad qabtid curyaanimo maqalka ama hadalka ah ama mowduuc dhaqaaq, waxaa khasab kugu ah in aad u sheegtid qofka istiqbaalka jooga marka aad samaysanaysid ballaantaada. Shaqaalaha soo dhoweynta jooga ayaa kugu caawin doona waxkasta oo nidaamin lagama maarmaan ah.



Haddii aad tahay Dhagoole, Dhagoole iyo Indhoole, ama magalka uu kugu adag yahay, oo aadna u baahan tahay turjumaanka luuqadda dhagooleyaasha, fadlan soo dhoweeyaya ogeysii. Turjumaan xirfadle ah ayaa la heli karaa, oo lacag la'aan a.



Waxaad heli kartaa caawimaad gaadiidka ah

Waxaad xaq u yeelan kartaa caawimo gaadiid oo aad ku tageyso ballantaada daryeelka caafimaad oo bilaash ah. Ballantu waa in ay noqoto adeegyada ay uu daboolo Apple Health. Noocyada caamka ah ee gaadiidka la heli karo waxaa ka mid ah: baska dadweynaha, fawjarrada gaaska, iyo lacag-celinta mutadawaca iyo macmiilka, daraawalo mutadawaciin ah, taksi, gawaaridda kursiga curyaamiinta ama gaari ayaa la heli karaa iyo bas ama diyaarad ganacsi. Liiska dalaaliinta ayaa laga heli karaa www.hca.wa.gov/transportation-help.

Maamulka Daryeelka Caafimaadka wuxuu ballan ku maray in uu bixiyo gelid ama helid loo simanyahay oo lagu galo ama lagu helo adeegaheena. Haddii aad u baahantahay guri diyaafadin, ama u baahantahay dukumeentiyo ku qoran luuqad kale ama qaabkale ah, fadlan wac 1-800-562-3022 Dooro khadka dheeriga ah 15480.

Xuquuqahaaga iyo masuuliyadahaaga

Qaanuun ahaan, waxaad leedahay xuquuqo khuseeya adeegaha daryeelka caafimaadka aad heshid, sidoo kale adiga waxaad leedahay masuuliyado gaar ah si ay kuugu caawiyaan in aad ahaatid oona horumarisid caafimaadkaaga ugana fogaatid qiimooyinka aan muhiimka ahayn. Waa suurtoogal in aad weysid qorshahaaga caafimaadka. Middaan waxay dhici kartaa haddii aadan haysan ballamada dhakhtarkaaga, aadan lashaqaynin dhakhtarkaaga daryeelka aasaasiga ah, iyo sababo kale. Fadlan nala soo xiriir haddii aad jeceshahay macluumaad baddan.

Adiga waxaad xaq u leedahay in:

- Laguugu caawiyo qaadashada go'aanada kusaabsan daryeelkaaga caafimaadka, ay kujirto diidista daaweynta.
- Laguula socod siiyo waxyaabaha kusaabsan dhammaan doorashooyinka daaweynta lahel, ayada oo aan la eegayn qiimaha.
- Heshid fikrad labbaad oo ka ahaata bixiye kale oo kujira qorshahaaga caafimaadka.
- Heshid adeego adiga oo aan sugin muddo dheer.
- Laguula dhaqmo si xushmad iyo sharaf leh. Midab takoor lama oggola. Majiro qof loola dhaqmayo si gooni ah ama si aan daacad ahayn jinsigooda, midabkooda, asalkooda dhallashada, noocooda, door bidid galmo, da'a, diin, caqiido, ama curyaanimu darteeda.
- Uga hadashid si xur ah waxyaabaha kusaabsan daryeelkaaga caafimaadka iyo welwelada ayada oo aan jirin wax natiijooyin xun.
- In lagu ulaaliyo ama lagu dhowro waxyaabahaaga gaarka ah iyo in macluumaada kusaabsan daryeelkaaga sir lagu dhowro.
- Weydiisid oona heshid nuqulo khuseeya diiwaanadaada caafimaadka.
- Weydiisid oona lahaatid sixitaano lagu sameeyo diiwanadaada caafimaadka marka loo baahdo.
- Weydiisid oona heshid macluumaad kusaabsan:
 - » Daryeelkaaga caafimaadka iyo adeegaha ceymiska kujira.
 - » Dhakhtarkaaga iyo sida loo sameeyo wareejinada waxaa sameeya takhasuslayaal iyo daryeel bixiyayaal kale.
 - » Sidda qorshaha caafimaadka u bixiso daryeel bixiyayaashaada loogu talagalay daryeelkaaga caafimaadka.
 - » Dhammaan doorashooyinka loogu talagalay daryeelka iyo sababta aad u helaysid noocyo gaar oo daryeel ah.
 - » Sida lagu helo caawimaad ayada oo lafayl gareeyo cabasho ama dacwo kusaabsan daryeelkaaga.
 - » Qaab dhismeedka qorshaha caafimaadkaaga urureed waxaa kamid ah siyaasado iyo qaab hawleed, heerar waxqabad, iyo sida loogu taliyo isbedelada.
- Ugu heshid Xuquuqaha Xubunimo iyo Masuuliyadaha ugu yaraan si sannad le ah. Xuquuqahaaga waxaa kamid ah caafimaadkaaga maskaxda iyo adeegaha jirada isticmaalka daroogada.
- U heshid macluumaadka dheefta daryeelka la maamuley, siyaasadaha, iyo adeegyada si sannadle ah iyo marka la codsado.
- Qaadatid liis kusaabsan lambarada teleefoonka dhibaatooyinka.
- Heshid caawimaada buuxinta foomamka maskaxda iyo toosinta daawada caafimaadka sareysa.



Waxaad leedahay masuuliyada in:

- Laguugu caawiyo qaadashada go'aanada kusaabsan daryeelkaaga caafimaadka, ay kujirto diidista daaweynta.
- Ilaalisid balamaha oona ahaatid wakhtiga laguugu talagalay. Wacdid xafiiska daryeel bixiyaashaada haddii aad soo daahaysid ama haddii ay khasab kugu tahay in aad burisid ballanta.
- Siisid daryeel bixiyaashaada macluumaada ay u baahanyihiin si loogu bixiyo adeegaha adiga lagu siinayo.
- U muujisid daryeel bixiyaashaada isla ixtiraamka adiga ayaga karabtid.
- Keentid Kaarka Adeegahaaga iyo kaarka Aqoonsiga qorshaha caafimaadka dhammaan balamahaaga.
- Baratid waxa kusaabsan qorshaha caafimaadkaaga iyo waxa ay yihiin adeegaha lageliyay ceymiska.
- Isticmaashid adeegaha daryeelka caafimaadka marka aad u baahatid.
- Ogaatid mushkiladaha caafimaadkaaga kana qayb qaadatid samaynta ujeedooyinka daaweynta la isku-raacay intiiba ay suurtoogaltahay.
- Siisid daryeel bixiyaashaada iyo qorshaha caafimaadka macluumaad buuxda oo kusaabsan caafimaadkaaga si aad u heshid daryeelka aad u baahantahay.
- Raacdid tilmaamaha daryeel bixiyahaaga ee loogu talagalay daryeelka adigu aad ogolaatay.
- U isticmaashid adeegaha daryeelka caafimaadka si sax ah. Haddii aadan sidaas sameynin, waxaa dhici karta in laguugu qoro Muraajacada Bukaanka iyo Barnaamijka Iskuduwida. Gudaha barnaamijkaan, adiga waxaa lagu xilsaarayaa hal daryeel bixiye aasaasi ah, hal farmashi, hal daawo qore oo loogu talagalay xakamaynta daroogooyinka, iyo hal isbitaal oo loogu talagalay daryeelka aan-degdega ahayn. Waxaa khasab kugu ah in aad joogtid isla qorshaha loogu talagalay ugu yaraan 12 bilood.
- Dhakhso noogu sheeg haddii qiyaasta dadka qoyskaaga isbedesho (sida uur, dhallasho, korsasho) ama ay daruufaa isbedesho (sida cinwaan cusub, isbedel kudhaca dakhliga, noqotid qof u qalma caawimaad Caafimaad ama ceymis kale)..

Haddii aadan kufaraxsanayn qorshahaaga caafimaadka

Adiga iyo Wakiilkaaga la Oggolaaday waxaad xaq u leedihiin in aad samaysaan fayl cabasho ah. Cabashadu waa cabasho qoran ama hadal ah oo khuseysa tayada daryeelkaaga ama sida uu kuula dhaqmay dhakhtarkaaga ama qorshahaaga caafimaadka. Marka aad samaysid ama dirtid fayl cabasho:

- Qorshahaaga caafimaadka waa in uu kuugu sheegaa tooska teleefoonka ama warqad gudaha labbo maalin shaqo in la helo cabashadaada.
- Welwelaada waa in loo sheego sida ugu dhakhsiyaha baddan ee ugu suurtoogalka ah, ayada oo aan qaadan wax kabaddan 45 maalmood.

Qorshahaaga caafimaadka waa in uu kugu caawiyaa dirida iyo samaynta cabashada.

Haddii aadan ku faraxsanayn go'aanka caafimaadka uu sameeyay qorshahaaga caafimaadka

Adiga ama Wakiilkaaga la Oggolaaday waxaad xaq u leedihiin in aad samaysaan ama dirtaan rafcaan. Rafcaanka waa nooc kamid ah cabashada aad samaysid marka aad doonaysid in qorshahaaga caafimaadka uu muraajaco ku samee go'aanka ay sameeyeen ee ku saabsan ceymis kujirada ama lacag bixinta adeega caafimaadka ceymiska ku jira.

- Qorshahaaga wuxuu kugu soo wargelin doonaa qaab qoraal ah go'aankooda. Haddii aad doonaysid in aad rafcaan ku samaysid go'aankooda, qorshaha caafimaadka wuxuu ku dari doonaa dukumeentiyo ku saabsan sida loo sameeyo ama loo diro rafcaan.
- Qorshahaaga caafimaadka waa in uu kuugu sheego qaab qoraal ah gudaha 5 maalmood in la helay rafcaankaaga.
- Wel-welwelaada waa in loo sheegaa sida ugu dhakhsiyaha baddan ee ugu suurtoogalka ah, waana in aysan qaadanin wax ka baddan 28 maalmaha kalandarka ah.

Qorshahaaga caafimaadka waa in uu ku siiyo oggaysiis qoran oo ku saabsan go'aankooda oona kugu caawiyaa dirida iyo samaynta faylka cabashada.

Matahay mid degdeg ah? Haddii aad samaynsid rafcaan go'aanka ah oona qabtid xaalad caafimaad dhaqameed ama jir degdeg ah, adiga ama daryeel bixiyahaaga waxaad weydiisan kartaan muraajaco ama dhagaysi degdeg (dhakhso) ah. Haddii xaaladdaada caafimaad u baahan tahay, go'aan ayaa laga

Halka laga helo jawaabaha su'aalahaaga

Haddii aad qabtid wax su'aalooyin ah oo kusaabsan...	Kalaxiriir...
<ul style="list-style-type: none"> • U qalmida loogu talagalay adeegaha daryeelka caafimaadka • Kaararka adeegaha • Isbedelo lagu sameeyo koontadaada xisaabta, sida: dakhliga, xaalada guurka, uur, dhallashooyinka, ama korsashooyinka. 	Foster Care Medical Team, 1-800-562-3022, ext. 15480.
<ul style="list-style-type: none"> • Doorashada daryeel bixiye • Adeegaha ceymiska kujira • Daryeelkaaga caafimaadka • Wareejino loogu talagalay takhasuslayaal 	Xiriirada Aasaaska Apple Health [Ee laga maamulo dhinaca Iskuduwida Daryeelka Washington (CCW)] 1-844-354-9876.

gaari doonaa ku saabsan daryeelkaaga saddex maalmood gudahood. Ugu noqo buuggyarahaaga xubinka wixii ku saabsan macluumaad faah-faahsan oo khuseeya tallaabadahaan.

Oggeysiis ku saabsan arimaha gaarka ah

Kaarka Adeegahaaga ma ahan mid ka kooban wax macluumaad shakhsi ah aan ka ahayn magacaaga, lambarkaaga ProviderOne, iyo taariikhda mowduuca. Middaan waxay ilaalinaysaa arimahaada gaarka ah ama sirtaada haddii kaarka uu lumo ama laxado. Ma ahan midna Maamulka Daryeelka Caafimaadka (HCA), maamulaha Apple Health, ama qorshahaaga caafimaadka mid weligooda si toos ah kuula soo xiriiri doona ayaga oo kuweydiinaya macluumaadaada shakhsiga ah si loo hayo ama loo bedelo Kaarka Adeegaha. Weligaaga hasiin macluumaadaada shakhsiga ah, sida lambarka Dammaanada Bulshada, qof kusoo waca ama boosto ama iimayl kuusoo dira kuna weydiista macluumaadaada shakhsiga ah.

Dhammaan qorshooyinka caafimaadka waxaa loogu baahanyahay qaanuun si loogu ilaaliyo macluumaadaada caafimaadka. Qorshooyinka caafimaadka iyo Maamulka Daryeelka Caafimaadka waxay isticmaalaan oona dad lawadaagaan macluumaada caafimaadka la dhowrey ee adiga kugu saabsan si loogu bixiyo dheefahaaga caafimaadka; loogu fuliyo daaweynta, lacag bixinta, iyo hawlaha daryeelka caafimaadka; iyo sababo kale oo lagu ogolaaday looguna baahanyahay dhinaca sharciga ama qaanuunka. Qorshooyinka caafimaadka iyo Maamulka Daryeelka Caafimaadka waxaa waajib kasaaran in ay ku ilaaliyaan macluumaadaada caafimaadka meel sir ah.

Si aad u akhrisid siyaasada khusuusiyaada ee Maamulka Daryeelka Caafimaadka (HCA) gal boggaan internetka ah www.hca.wa.gov kadibna ku dhufo dusha *Khusuusiyaada* ee ah hoosta bogga. Haddii aad doonaysid in aad akhrisid waxa kusaabsan siyaasada sirta ah ee qorshahaaga caafimaadka, wac xubinkaaga adeegaha qorshaha caafimaadka ama booqo bogga intarnatka qorshaha.



P.O. Box 42719
Olympia, WA 98504-2719
HCA 19-047 SM (10/19) Somali